


Mustaqbalkaaga ka raadso Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Minnesota.



- Barnaamijyada waxbarashada ay tiradoodi kor u dhaafayso 3,500
- 54 rug jaamacadeed ee ku kala firirsan gobolka
- Waxbarasha heer sare oo qiima weyn leh

Fursadda qorshaynta isu diyaarinta jaamacadda ma laha waqti la dhihi karo waa lagu deg-degay. Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Gobolka ee Minnesota ee 32da waxa ay bixiyaan fursado badan.

- Kulliyadaha farsamada gobolka, kulliyadaha deegaanka iyo kulliyadaha farsamada midaysan waxa ay bixiyaan barnaamijyada halka sano ama labada sano. Waxa aad la hoyan kartaa shahaado, aqoonsi ama darajo deegaanka looga shaqaysto. Ama waxa aad hanan kartaa shahaado jamaacadeed ee labada sano iyo in aad u wareegi kartid jaamacad affar sano si aad shaahaada jaamacad u hanatid.
- Jaamacadaha gobolka waxa ay bixiyaan boqolaallo barnaamijyo ee lagu qaadanayo shahaado jaamacad, shaahado sare ama taqasus sare.

Weydiiso lataliyaha dugsiga sare ama xarunta xirfadaha si aad uga qaadatid koobiga buugga "Go Places" tilmaan-bixiyaha lacagala'aanta ah ee Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Gobolka ee Minnesota. Kaddibna si toos ah ula soo xiriir rugta jaamacadda ama aqbaar dheeraada ka raadso internetka www.mnscu.edu.




Minnesota
STATE COLLEGES
& UNIVERSITIES

TWIN CITIES 651.296.8012
TELEFOONKA LACAGLA'AANTA
1.888.667.2848
TTY: 651.282.2660
www.mnscu.edu

Nidaamka Kulliyadaha iyo Jaamacadaha waa waxbare iyo loo shaqeeye bixiya Fursadaha Loo Simanyahay (Equal Opportunity).

WADIIQO OYINKA HORUMARKA LAGU GAARAYO

CAAWIMAADDA DHALLINTAADA MINNESOTA AAD KA SIINAYSID JAAMACADDA IYO GO'AAMADA XIRFADAHA



Diyaar ma u Tahay
in aad Horkacdid
Dhallintaada?

TILMAAN - BIXIYAH A WAALIDKA MINNESOTA

Dhallintaada Aad ka Caawisid Go'aammada Jaamacadda iyo Xirfadda

Hadda, dhallintaada waxa ay aqbaar badan ka helaan dugsiga iyo warbaahinta waxa laga yeelayo marka laga baxo dugsiga sare – la aado kulliyadda labada sano, jaamacad la dhigto, shaqo lagu raadsado meheraddaan, shirkaddaas loo shaqeeyo, iyo aqbaaro kale. Gacanqa-qabashadaada waxa ay dhallintaada ku caawinaysa in uu darso aqbaartan oo dhan iyo in uu doorto waxa mustaqbalkiisa iyo shaqsiyaddiisa anfacya.

Waa waqtigii dhallintaada ay waxbarashada iyo fursadaha shaqada oon dhan ay eegaan. Iska-dhagatirka sahminta xirfadahaaga maanta waxa ay yareyn kartaa fursadahaaga mustaqbalka. Waxa aad dhallintaada ku caawin kartaa fahamka dugsiga sare saamaynta weyn oo ay ku yeelan karto fursadaha jaamacadda iyo tababarrada kale.

Marka aad door ka ciyaartid sahminta xirfadaha dhallintaada, waxa aad dhallintaada ku caawinaysaa in uu ku kifaaxo fursadaha mustaqbalka leh iyo isku filnaanshaha dhaqaalaha.

Isbaddalka Dhaqaalaha, Isbaddalka Rajooyinka

Suuqa shaqada ee Minnesota lamid maaha kii ka jiray 10 illaa 20 sano kahor. Isbaddallada dhaqaalaha caalamka door weyn ayaay ka cayaaran waxa uu shaqaalaha uu filayo. Rajooyinkan waxay baddalayaan sida manta ay kuwo shaqo doonka ah ay ku talagal ugu sameyaan xirfadahooda.

Hoos waxaa ku taxan xalaaado dhaqaale ee dhab ah ee uu dhallinkaada ka filayo dhaqaalaha maanta jira. Xaladahaan waxa

dhici karta in ay si dhab uga duwanyihiin kuwi jiray marka aad adiga ka qalanjabisay dugsiga sare.

Waxbarasho Dheeraad ah & Tababar Loo Baahanyahay

Shaqooyinka badankood waxa ay doonayaan tababar dheeraada qaarkood ama waxbarasho dhaafsan tan dugsiga sare. Shaqooyinka kugu xiraya in aad waxbarasho dugsi sare kaliya leedahay fursad kuuma siinayaan in aad horumar samaysid mushaar fiicana ma bixiyaan.

Xoogsaaridda Xirfadaha

Inta lagu jiro shaqo la'aanta, loo shaqeeyayaasha marka ma ceshadaan shaqaalaha muddo badan u shaqaynayay. Loo shaqeeyayaasha waxa ay qiimeeyaan xirfadaha qaaska iyo awoodda waxsoosaarka marka loo eego tirada inta sano ee loo shaqeeynayay.

U Diyaargarowga Isbaddalka Ayaa Furaha ah

Si horay loogu maro xirfadaha, dadka waa in ay diyaar u ahaadaan isbaddallada iyo bartaan isbaddallada tignoolojiyada iyo dhaqamada ganacsiga ka jira.

Maamulka Xirfadaha Shaqsiga

Waa caadi in dadka u kala baddalanaya shirkadaha ay u shaqeeyaan ama baddalaan xirfadahooda dhowr jeer inta ay noolyihiin. Shaqsiyaadka waa in ay la socdaan xirfadahooda gaarka iyo qorshooyinka hawlgabnimada.

WADIIQOYINKA HORUMARKA LAGU GAARAYO

Dano badan ayaad ku leedahay horumarka xirfadaha caruurtaada, sababta oo ah waxa laga yaaba in ay caawimaad ku weydiistaan haddii ay dhib badan kala kulmaan billaabidda xirfadahooda. Lataliyayaasha dugsiga wax badan ma qaban karaan sababta oo ah waxa ay haystaan arda tira badan oo doonaya in la caawiyo, mana aha dad aqoon gaar u leh dhallinkaaga. Dhallinyarada wax badan iskood uma qabsan karaan, bacdama waaya aragnimda ay shaqada u leeyihiin ay tahay mid aad u kooban.

Tilmaan-bixiyahan *Pathways to Success* ee waalidka ayaa ku toosinaysaa in uu ka caawiyo dhallintiisa sahminta nidaamka xirfadaha iyo suuqa shaqada maanta jirta.

FAAFINTA MACLUUMAADKA

Pathways to Success waxaa lagu qoray laguna daabacay wadashaqayn lala sameeyay Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota, Waaxda Waxbarashada ee Minnesota iyo iSeek Solutions. Warbixinta waa la daabacay waxaana lagu faafiyay ayadoo la isticmaayo maalgalin federaal ah ee ka timid Carl. D. Perkins Vocational iyo Technical Education Act ee 2006. Nidaamka kulliyadaha iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota iyo iSeek Solutions waa waxbarayaal iyo shaqaaleeyaal leh fursadaha Loo Simanyahay.

Fikrad Celin u Dir: Perkins@so.mnscu.edu. Kaddib marka aad codsatid, qoraalkaan daabacan waxaa lagu siin karaa qaab kale ayadoo la soo wacayo waxa soo socda: Lambarka Guud: (651) 296-8012; Lambarka Lacagla'aanta: (888) 667-2848; TTY: (651) 282-2660.

- 1 Aan Isu Diyaarinno in aan Dhallintaada ku Caawinno Go'aamada
- 2 Maxay Rabaan Loo Shaqeeyayaasha?
- 3 Dhallintayda Diyaar Ma u Yahay Nollosha Dhabta ah?
- 4 Danaha Qiimaynta Xeerka Holland
- 6 Maxaa si Gaar ah loogu Eegaya Shaqooyinka Aad Ioo Rabo?
- 7 Dabaqadaha Xirfadaha
- 8 Shaqooyinkda Aad Looga Baahanyahay Minnesota
- 10 Maxaa Xirfadaha Clusters iyo Xirfadaha Pathways Ay Muhiim u noqdeen?
- 11 Garaafka Xirfadaha Clustser oo Kooban Cluster
- 12 Majaalka Xirfadaha Minnesota, Clusters & Pathways
- 14 Maxaa Laga Raba in uu Waalidka Qabto? Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo
- 16 Naseteexoyinka Ay Waalidka Ku Caawinayaan Qorshooyinka Xirfadda
- 18 Tallaabooyinka Lagu Dooranayo Dhabbaha Xirfadda
- 19 Ilaha Kulliyadda & Indho-dheynta Xirfadda
- 20 Barnaamijyada Kulliyadaha Gobolka & Jaamacadaha Gobolka Minnesota



Minnesota
STATE COLLEGES
& UNIVERSITIES

Minnesota
Department
of Education



Maxay Doonayaan Loo Shaqeyeyaasha Minnesota?

Marka aad eegaysid waxa ku saabsan xirfadaha shaqada, waxa ay kula tahay in ay yihiin wax gooni u ah shaqo qaas ah. Laakiin waxa jira xirfado xayn ah ee sare oo nooc walba ah oo ay loo shaqaaleeyeyaasha qabaan in ay lagamaarmaan u tahay sidii loogu horumari shaqada la qabanayo. Koxayntan xirfadaha waa kuwo loo wareejin karo iyo loo adeegsan karo shaqooyin kasta ee nooc kasta ah. In waxbarasho fiican looga soo qaato jaamacadda iyo barnaamijyada farsamada kulliyadaha ayaa laysaga rabaa xirfadahaan.

Xirfadahaan xaynta ah ee sare waxa ay u kala qaabsanyihiin laba kooxood: xirfadaha farsamada gacanta iyo xirfadaha aqoonta habdhaqanka. Xirfadaha farsamada si lagu barto waxa inta badan u bahanyiin tabarbar waxayna qaas u yihiin noocyo shaqooyin qaarkood sida loo isticmaalo buriska ama in la fahmo barnamij wareer badan ee kombiyuutarka ah.

Xirfadaha fudud waa kuwa habdhaqanka, sida dabecadda qofka gaar u ah iyo dhaqanka wanaagsan ee bulshannimada oo ay shaqaalaha oo dhan ay haybiyaan. Xirfadahaan waxa ay qofka shaqaalaha ah ku caawiyaan sida uu dadka kale ula shaqaysan lahaa iyo sidii dadka loola macbilo

Qaar kamid ah xaynta xirfadaha fudud waa:

- Isgaarsiinta
- Anshaxa
- Wadashaqaynta
- Naqdinta Fikirka
- Xallinta Xisadaha
- Masuuliyadaha Sharciga ah

Liistada dhammaystiran ee aasaaska salka u ah aqoonta iyo xirfadaha xaynta ah waxaa laga heli karaa xarunta garaafka Wadiiqooyinka Xirfadaha (Career Fields) ee ku yallaa bogagga 12-13.

Isku-xirirka Dugsiga Sare

Sideebuu ilmahaaga uu ku heli karaa xirfadahaan iyo aqoonta looga baahanyahay shaqada iyo jaamcaddaba? Aasaaska xirfadaha aqoonta waxaa lagu bartaa fasallada dugsiga sare iyo waxbarashada dheeraadka ah ee waqtiga dugsiga xiga. Hawlaha ku salaysan barashada shaqada, sida tababarka barashada shaqa gaar ah, naseexaynta iyo kor kala socodka shaqada ayaa iyana kordhinaya xirfadahaan.

Qofkasta—oo aan ahayn kaliya ardada u gudbaysa jaamacadaha—waa inu si taxaddir leh uu doorto fasallada uu ka qaadanayo dugsiga sare sii uu ku helo xirfadaha laga rabo ee shaqada guul looga gaarayo.

Jadwalka hoose waxa uu taxaya fasallada dugsiga sare ee daraasaadka ugu yaraan lagu talinayo in diyaar loogu noqodo jaamacadda iyo shaqadaba.

Maaddada	Inta sano * (Lagu talinayo)	Maxay Muhiim u Tahay?
Ingirisiiga	4	Waxa ay ka caawinaysa xirfadaha qorista iyo aftahannimada looga baahanyahay shaqooyinka iyo nolol maalmeedka.
Xisaabta	3-4	Waxay hormarinaysaa xirfadaha maalin kasta la isticmaalo iyo awoodaha furfuridda masalooyinka.
Sayniska Bulshada	3-4	Waxay kordhinaysaa la socodka arrimaha caalamka ka jira, dhaqaalaha iyo xaaladaha bulshada.
Sayniska	3	Waxaa lagu fahmaya sida ay bey'aadda u shaqayso iyo lagu hormarinayo xirfadaha wax lagu qabsanayo.
Luqadda Caalamka	2	Waxay kordhinaysaa la socodka dhaqamada kale iyo fursad looga shaqaysto suuqa caalamka.
Farshaxanka	1	Waxay kobcinyasa ra'yiga dhisidda iyo horumarinta maslaxado kala dawan.

*Ilaha: www.getreadyforcollege.org

Dhallintayda diyaar ma u yahy Noloshu Dhabta ah?

Dhallintaad ma haya waddada lagu dhisayo xirfadaha looga baahanayhay jaamacadda ama shaqada? Si fiican uga warhay darajada iyo iska xaadirinta dugsiga. Loo shaqeyeyaasha iyo wakillada galitaanka jaamacadda waxa ay eegayan iska xaadirinta dugsiga sare iyo darajooyinka oo noqonaya caalamadaha saadalinaya sida horumarka uu ardaygan jaamacadda ama shaqada uu garaayo.

Qorshaha jaamacadda/xirfadaha shaqo ee dugsiga. Weydii baraha ama lataliyaha dhallintaada hawlaha ay dhallintaada fasalka ka qabtaan iyo in ay ka qaybqaateen hawlaha jaamacadda iyo sahminta xirfadaha shaqada. Siduu u dhisan yahay qorshaha xirfadaha dugsiga sare?

Riwaayadaha iyo kuwa dheeraadka ah. Fasallade, ururradee, ama hawlahee buu dhallintaada ayuu jecelyahay in uu ka qaybqaato marka waxbarashada dugsiga uu soo dhammaysto? Farsamadee ama xirfaddee waxbarashada ayay hawlahaasi kobcinayaan?

Aqlaaqda. Dadka aqlaaqda fiican leh waxa ay u badanyihiin in ay gaaraan ujeeddoyinkooda. Dhallintaada ma yahay mid iskiis u leh aqlaaq fiican iyo mustaqbalka? Waxa ugu fiican ee aad dhallintaada wax uga qaban kartid waxay tahay in dhallintaada uu aqlaaq fiican oo ku dayasho leh muujyo.

Qiimaynta Aqbaarta

Dhammaan dugsiyada sare ee Minnesota waxa ay dugsiyada u isticmaalaan heer imtixaam si ay ula socdaan horumarka ardayga. Imtixamadaaan waxay u jeedaan hal dhinac ee lagu qiimaynayo heerka aqoonta dhallintaada ee maaddooyinka muhiimadda u ah loo shaqeyaha iyo jaamacadaha.

Eegidda sida ay aqoonta dhallintaada ku qancinayoso shaqo la helayo waa muhiim. Laakiin ogaanshaha shaqada qancinaysa aqlaaqda dhallintaada waa muhiim.

Danaha qiimaynta ee ku yaalla bogga xiga waxa ay ku salaysan yihiin Holland's Interest Inventory. Qiimayntan ee lala yeelanayo dhallintaada iyo uu ka hadlayo xirfadaha ku habboon danaha dhallintaada.

Haddii aad ogtahay sida ay tahay Holland Interest Profile ee dhallintaada, waxa aad durbadiiba u gudbi kartaa bogga 5d si loo qanciyo danahooda koodka Wadiiqooyinka Xirfadaha.

Qiimaynta danaha waa mid kamid ah kuwo badan. Eeg bogga 19d oo ay ku yaallaan qiimeyno kale iyo fursadaha sahminta.

Dadka fikradda fiican ka haysta sida ay yihiin waxa ay u badanyihiin in ay gaaraan ujeeddadooda. Dhallintada ma yahay mid iska qaba fikrad fiican iyo mustaqbalkaba.



Koodka Holland ee Waxa La Daneeya Qiimeeya

Bayaan kasta ee hoos ku yaalla aqri. Haddii aad adeecsantahay, goobaabada ku addaan buuxi.

...samaynta halxiralayaasha		○				
...farsamaynta gawaarida	○					
...aadista ruwaayadaha, shaneemooyinka ama bandhigyda farshaxanka			○			
...kooxaxa lala shaqeeyo				○		
...galalka lagu agaasimeeyo macluumaadka, xafiisyada ama hawlaha						○
...aan iskayga wax u qorshaysto					○	
...aan waxyaalo samaysto	○					
...aan aqristo sheekooyinka qiyaaliga, gabayada iyo maansooyinka			○			
...aan fikrad fiican ka haysto tilmaamaha xiga ee la raacayo						○
...aan dadka duufsado ama wax ka dhaadhiciyo					○	
...aan wax tijaabiyo		○				
...aan dadka waxbaro ama tababaro				○		
...aad dadka ku caawiyo si ay dhibaatooyinka haysta u xalliyaan				○		
...aan xoolaha xannaaneeyo	○					
...aan maalintayda sii qorshaysto						○
...aan badeecada iibiyo					○	
...aan qoro waxa aan hindiso			○			
...aan ka shaqeeyo qorshooyin saynis ah		○				
...aan wax ka qabto masuuliyado cusub					○	
...aan dadka daaweeyo				○		
...aan isku dayo sida ay wax u shaqeeyaan		○				
...aan wax isku duwo ama iskudhejiyo waxyaabo	○					
...aan maxskaxdayda wax ka maago			○			
...aan sii fiican u kuurgalo waxyaabaha yar yar						○
...aan wax iksu habeeyo ama wax teebgareeyo						○
...aan wax ka barto dhaqamada kale				○		
...aan qiimeeyo dhibaatooyinka, xaalado ama waxyaabaha la xiiseeyo		○				
...aan qalbaka muusikada ciyaaro ama heeso			○			
...aan ku fakaro in aan bilaabo shirkad aan leeyahay					○	
...aan wax kariyo	○					
...aan wax matalo			○			
...aan waxa aan qabanayo ka fiirsado intaa aanan ku dhaqaaqin	○					
...aan ka shaqeeyo lambarrada ama qariidadaha		○				
...aan kala hadlo arrimaha sida siyaasadda ama waxyaabaha hadda socda				○		
...aan diiwaangeliyo shaqadayda						○
...aan hoggaamiye noqdo					○	
...aan bannanada ka shaqaysto	○					
...aan xafiiska ka shaqaysto						○
...aan furfur masooliyinka xisaabta		○				
...aan dadka caawiyo				○		
...aan wax sawiro			○			
...aan qudbeeyo					○	
	R	I	A	S	E	C

My Interest Profile (top three letters with the highest scores):

Xirfaddee Danahaaga Qancinaysa?

L istada u isticmaal si aad ku indha-indheysid Xirfadaha (Career Clusters) oo ay la socdaan shaqooyin qancinaya warbixintaada saddexda xaraf. Aqbaarta ku saabsan Xirfadahada (Career Custers) iyo shaqooyinka iyaga ku jira waxa laga soo saari kara internetka ISEEK (www.ISEEK.org).

R • REALISTIC-DHAB AH

- Beeraha
- Hindisaadda & Dhismaha
- Farshaxanka & Isgaarsiinta
- Sayniska Caafimaadka
- Soodhoweynta & Dalxiiska
- Warbaahinta Tinkolojiyda
- Sharciga & Ammaanka Shacabka (Law & Public Safety)
- Warshadaha (Manufacturing)
- Sayniska, Tinkolojiyda, Injineernimada & Xisaabta (Science, Tinkolojiyada, Injineernimada & Xisaabta (Technology, Engineering & Math)
- Gaadiidka (Transportation)

I • INVESTIGATIVE-BARITAANKA

- Sayniska Caafimaadka (Health Science)
- Warbaahinta Tinkolojiyda (Information Technology)
- Sayniska, Tinkolojiyda, Injineernimada & Xisaabta (Science, Technology, Engineering & Math)

A • ARTISTIC-FARSHAXANNIMADA

- Farshaxanka & Warbaahinta
- Waxbarashada & Tababarka

S • SOCIAL-BULSHADA

- Waxbarashada & Tababarka
- Dawladda
- Sayniska Caafimaadka
- Sharciga & Ammaanka Guud
- Suuq-galinta & libinta

E • ENTERPRISING-GANACSI ABUURIDDA

- Farshaxanka & Warbaahinta
- Ganacsiga & Maareynta
- Maaliyadda
- Dawladda
- Soodhoweynta & Dalxiiska
- Sharciga & Ammaanka Guud
- Suuq-galinta & libinta

C • CONVENTIONAL-CAADIGA

- Naqshadda Dhismaha & Dhismaha
- Ganacsiga & Maamulidda
- Maaliyadda
- Sayniska Caafimaadka
- Warshadaha
- Suuq-galinta & libinta
- Gaadiidka



Maxay Taraysaa Taariiq Noololeedkan Aniga igu Saabsan?

Dadka Waaqiiciga ah

waxa ay yiin kuwa WAXQABSADA. Waxa ay jecelyihiin in ay ku shaqeeyaan sheyada sida mashiinaha, qalabka ama geedaha waxayna jecelyihiin in ay gacmohooda ku shaqeeyaan. Intabadan waa kuwa og sida wax loogu dabbaqo kuna fiican xallinta dhibaatooyinka.

Dadka Wax Indha-indheeya

waa HINDISAYAAL. Waxa ay jecelyihiin in ay wax eegaan, bartaan iyo falanqeyaan masalooyinka. Waxa ay inta badan jecelyihiin in si madax bannaan u shaqaystaan, waxay ku fiicanyihiin xisaabta iyo sayniska, waxayna ka helaan in ay falanqeyaan xogta.

Dadka Farshaxanka

waa ABUURAYAAL. Waxa ay jecelyihiin in ay ku shaqeeyaan qaab aan qorsho lahayn markaa ay isticmaalayaan abuuritaakooda iyo inu la yimaada fikrado cusub. Inta badan waxa ay ka helaan muujiinta iyo farshanka muuqda.

Dadka Bulshada ah

waa CAWIYEYAAL. Waxa ay jecelyihiin in ay dadka la shaqeeyaan inta waxyaabo ka shaqayn lahaayeen. Waxa ay ka helaan tababaridda, waxbaridda, latalinta ama daaweynta dadka kale.

Dadka Awood Wax-Fulinta leh

waa QANCIYEYAAL. Waxa ay jecelyihiin in ay dadka kale la shaqeeyaan; waxa ay si gaar uga helaan in dadka wax jecelaysiayaan, ka dhaadhiciyaan iyo waxqabsadaan. Waxa ay ka helaan in ay wax hoggaamiyaan waxayna u badanyiin in ay yihiin kuwo fikirhooda ku adag iyo bulsho ah.

Dadka Caadiga

waa ABAABULAYAASHA. Waxa ay aad ugu janjeeraan tifatimaanta iyo waxa ay jecelyihiin in ay macluumaadka ka shaqeeyaan. Waxa ay leeyihiin xirfado agaamsimeed ee karti badan waxayna ku fiicanyihiin in ay tilmaan-bixinnada raacaan.

Wamaxay Sababta Loo Qiimaynayo Shaqooyinka Aad loo Jecelyahay?

Waxaa jira magac darajo soo jiidasho leh ee loo isticmaalo si looga warbixiyo “shaqooyin aad loo rabo” ee loo baahanyahay qofka xirfadaha indho-indheeya in uu xusuusnaado. Maxaa shaqo ama noc shirkado ka dhigaya mid “aad loo raabo” ama la doon-doonaayo?

Sidee xirfad aad loo qiimaynayo ay dhallintayda shaqo uga caawin kartaa? Marka lagu jiro muddada shaqooyinka ay isbaddalayaan, kuwa xirfadaha indho-indheeya waxa ay u baahanyihiin wadiiqadaha xirfadada ee u baahnaan doona shaqaalebadan muddada 10ka sana ee soo socda. Sida awgeed qofka wax indho-indheeya ama ardayga waxa ay saadaalin karan fursadhooda ay shaqo ku helayaan kaddib marka ay dhammaystaan waxbarashada ama tabarbarka xirfadada.

Marka lagu jiro muddo shaqooyinka ay isbaddalayaan, kuwa xirfadaha sahminta waxa ay u baahanyihiin wadiiqadaha xirfadada ee ay u baahnaan doonaan shaqaale badan inta u dhaxeysa 10ka sana ee soo socda.

- Warshadaha lagu saadalinayo in ay shaqooyin badan ka furnaan doonaan muddo 10 sana (2006-2016).
- Wadiiqooyinka xirfadada oo leh hawlo shaqo ama lagu isticmaalayo xirfado looga baahanyahay in ay ku caawiyaan oo uu dhaqaalaha Minnesota ku xoogaysanayaan.

- Wadiiqooyinka xirfadada oo inta badan ka roon kuwa kale ee lagu helayo shaqo mushaar fiican bixisa, oo shaqo joogta ah iyo fursado lagu horumarayo.

Isudiyaarinta Shaqooyin aad Loo Rabo

Haddii uu dhallintaada doonayo xirfad shaqo ee aad loo rabo, weydii dugsiigaaga sare si aad ku ogaatid haddii ay leeyihiin Barnaamij Waxbarasho (Program of Study) oo u dhigma ujeeddoyinka dhallintaada.

Barnaamijka Waxbarasho waa manhaj maadooyin taxan oo kuwa wax baranaya ku caawinaya in ay isu diyaariyaan xirfadada ay doorteen. Dhallintaada waxa uu bilaabi karaa in uu qaato fasalladaas dugsiiga sare iyo waxa uu sii wadi doonaa in uu qaato fasallo jaamcadda laga bixiyo oo la socda Barnaamijka Waxbarasho. Barnaamij kasta waxa lagu baranaya xirfad iyo aqoon ay loo shaqeeyayaasha ka filayaan kuwa shaqo ka doonaya in ay haystaan waadiqada xirfaddaas.

Bogga 11aad ka eeg aqbaar ku saabsan Barnaamijka Waxbarasho.



Shaqooyinka aad loo Rabo.

Xirfadaha aad u Fidaya.

Shaqooyinka aad loo Qiimaynayo.

Dabaqadaha Xirfadada

Dabaqadaha xirfadada waxa ay dadka ka caawiyaan in ay ka bartaan waxa ay yihiin fursadaha uga furan Wadiiqadda Xirfaddaas. Dabaqadaha xirfadada ee badan, sida labada tusaale ee hoos ku xusan, waxa ay leeyihiin wax muujinaya horumar laga sameeynayo labada heer. Horumarrada xirfado badan waxa u hormaraan si janjeerta

(horizontally) ama kor u taagan.(vertically) taaso ay dhici karto in laga helo wax ka badan hal fursad ee xirfadada lagu beddelanayo. Tusaalooyinka muuqda waa Wadiiqooyinka Xirfadada uu qof laga yaabo in ay ku soo maro xirfad warshadeed ama caafimaad kaddib marka la qaato waxbarashada iyo waaya aragnimada laysaga baahanyahay Minnesota.

MAGACA DARAJADA SHAQADA	TABABARKA/WAXBARASAHDA LAYSKA RABO	MUSHAARRADA HOOSE/DHEXE
Agaasimeyaasha Injineernimo Qoorshahay, agaasinka, iyo isuhabaynta hawlaha xirfadaha sida muhandisnimada iyo injineernimada ama baarista iyo horumarinta ka jirta wadiqooyinkaas.	Shahado Sare ee Jaamacadeed Badankooda waxa ay haystaan shahaada sare ee jaamacadeed ee 6da sano oo ay sii racayso waaya aragnimo shaqo.	\$43.40/\$52.60
Injinnerada Farsamada Qorshaynta ama sawiridda qalab, motorro weyn, motoorro ama qalab kale. Laga yaabo in uu horseedo ku rakibidda, hawl socodsiinta ama kabidda.	Shahaado Jaamacadeed Badankooda waxa ay haystaan shaahaado jaamacadee ee injineernimo. Shati ayaa layska rabaa.	\$27.60/\$33.40
Farsamayaqaannada Farsamada-Korontada Howlsocodsiinta, tijaabinta, iyo socodsiinta motorro iskii u socda, iskii u shaqeynaya, hawl farsamayn, ama qalabka farsamada korontada. Kuwo badan ayaa injinerrada ku caawiya tijaabinta iyo hindisidda qalabka iskooda u shaqeeya.	Shahaadada 2 sano Badankooda waxa ay haystaan shaahaadada laba sano ama tababar rasmi ah ka haysta loo shaqeeyahooda.	\$20.60/\$23.60
Farsameeyayasha Qalabka & Rinjiga Soo saaridda qalabka isku rakibaya motoorrada ee wax lagu soo saarayo, ay kamid yihiin dharka iyo maacuunta illaa motorrada waaweyn iyo isbeerka gawaarida.	Tababar Shaqo Badankooda waxa ay haystaan tababarro soconaya illa 3-4 sano.	\$17.90/\$23.10
MAGACA DARAJADA SHQO	TABABARKA/WAXBARASHADA LAYSKA RABO	MUSHAARRADA HOOSE/DHEXE
Kalkaaliyayaasha Darajada Sare leh Kalkaaliyayaasha darajada ee haysta tababar sare si ay iskooda u hawlgalaan qabtana doorar aqoon qaas leh. Waxaa kamid ah Kalkaaliyaha Heerka Sare iyo Kalkaaliyaha Shahaadada U Leh Foosha.	Shahaado Sare ee Jaamacadeed Badankooda waxa ay haystaan shahaadooyin, shahaado sare ama kuwo dhaqtarnimo.	National Average: \$39.10
Kalkaaliyaha Heerka Sare Qiimaysaa caafimaadka iyo daryeeka qofka jirran ama dhawacan. Waxa laga yaaba in ay bukaanka kula taliso mamulka daryeelka.	Shahaado 2-4 Sano Badankooda waxa ay haystaan shahaadada labada sano ama shahaado jaamacadee. Shati ayaa layska rabaa.	\$27.50/\$32.90
Kalkaaliyaha Haysta Shahado Shaqo Daryeesha bukaannada laga helo isbitaallada, bukaan-eegtooyinka, guryaha waayeelka iyo guryaha gaarka loo leeyahay. Waxa ay u badantahay in ay ka hoos shaqeyso kalkaliyaha heerka sare.	Shahaadada 1-2 sano Badankooda waxa ay qaataan tababarro soconaya 1-2 sano. Shati ayaa layska rabaa.	\$16.50/\$18.70
Kaaliyayaasha Kalkaaliyaha Ka hoos shaqeeya shaqaalaha caafimaadka ama kalkaaliyaha si loo daryeelo bukaanka. Laga jaboo in ay cunto siiso bukaanka ama ay qabato/uu qabto hawlo kale. Waxaa kamid ah Kaaliyayaasha iyo Orderlies.	Shahaado 1 sano ka yar Inta badan waxay qaateen 75-80 sacadood ee tababarka horjoogannimada. Waxa laga rabaa imtixaam laga qaado iyo shati.	\$11.10/\$12.70

SAMBALKA DAQAABADDA XIRFADDA EE KALKALINTA

SAMBALKA DABAQADDA XIRFADDA EE WARSHADDA

Ilaha: Waaxda Shaqada iyo Horumarka Dhaqaalaha ee Minnesota

Shaqooyinka Aad looga Rabo Minnesota

Shaqooyinka hoos ku xusan waa sambal xirfado badan ee laga filayo in ay buuxiyaan boosaska ugu badan ee Minnesota sanadada 2006-2016.

KOOKAYNTA XIRFADAHA	WADDADA XIRFADDA	MAGACA SHAQADA LA HAYO	MUSHAARKA HOOSE	MUSHAARKA DHEXE	TABABARKA/WAXBARASHADA LAYSKA RABO
Beeraha, Cuntada & Ilaaha Bey'aadda (Agriculture, Food & Natural Resources)	Qaabka Adeegyada Bey'adda (Environmental Service Systems)	Farsamayaqaannada Bey'adda & Sayniska Bey'adda	\$15.00	\$19.40	Shahaadada Labada Sano
	Wax soo-saarka Cuntada iyo Hababka Warshadaynta (Food Products and Processing Systems)	Qubarada Cuntada & Tignolijistayaasha	\$19.20	\$27.30	Shahaadada Jaamacadeed
	Hababka Xayawaannada (Animal Systems)	Tignolijistayaasha Caafimaadka Xoolaha & Farsamayaqaannada	\$11.00	\$13.60	Shahaadada Labada Sano
Naqshadda Dhismaha & Dhismaha (Architecture & Construction)	Naqshadda/ Dhismaha Ka Horreeya (Design/Pre-construction)	Naqshd-sameeyayaasha Dhismahainta	\$25.30	\$32.60	Shahaadada Jaamacadeed
	Dhismaha (Construction)	Oiyaasaaha Qarashka	\$20.20	\$26.60	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
	Daayactirka/ Hawl-socodsiiinta (Maintenance/Operations)	Farsamayaqaanna Nidaamka Kulka & Qaboojinta	\$14.80	\$18.90	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
Farshaxanka Tignolijiyada A/V & Isgaarsiinta (Arts, A/V Technology & Communications)	Tignolijiyada Daabacaadda (Printing Technology)	Daabacayaasha Kombiyutarka	\$13.20	\$26.10	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
	Farshaxanka Muuqda (Visual Arts)	Indheergarata Warbaahinta Farshaxanka & Filim Abuurayaasha	\$19.80	\$24.10	Shahaadada Jaamacadeed
	Saxaafadda & Warbaahinta (Journalism & Broadcasting)	Qubarada Cilaaqaadka Guud	\$18.10	\$23.80	Shahaadada Jaamacadeed
Ganacsiga, Agasinka & Maamulka (Business, Management & Administration)	Maareynta Ganacsiga Maaliyadda & Xisaabaadka (Business Financial Management & Accounting)	Xisaabiyayaasha & Xisaab Hubiyayaasha	\$21.30	\$27.40	Shahaadada Jaamacadeed
	Suuq-gaynta (Marketing)	Maamulayaasha Suuq-galinta	\$35.10	\$21.90	Shahaadada Jaamacadeed Lagu Daray Waaya-aragnimada Shaqada
	Maamulka & Taageerada Warbaahinta (Administrative & Information Support)	Horjoogayaasha Maamulka Xafiiska iyo Taageeridda	\$17.00	\$24.00	La Xiriirto Waaya Aragnimada Shaqada
Waxbarashada & Tababarka (Education & Training)	Waxbaridda & tababarka (Teaching/Training)	Barayasha Waxbarashada Dadka Waaweyn, Waxbarashada Dib Loo Qaadanayo & GED	\$16.60	\$18.90	Shahaadada Jaamacadeed
	Maamulka & Taageerada Hawlaha Maamulka (Administration & Administrative Support)	Maamuleyaasha Barbaarinta & Waxbarashada Daryeelka Caruurta	\$14.90	\$22.30	Shahaadada Jaamacadeed Lagu daray Waaya-aragnimada Shaqada
	Waxbaridda & Tababarka (Teaching/Training)	Bareyaasha Shaqada Waxbarashada, Waxbarsho Dugsi Sare Dhafsan	\$16.70	\$22.30	Shahaadada Sare ee Jaamacadeed
Maaliyadda (Finance)	Adeegyada Caymiska (Insurance Services)	Saxayaasha Cabashooyinka, Xisabiyeyaal & Bareyaasha	\$19.30	\$25.40	Tababarka Muddada Dheer ee Rugta Shaqada
	Maaliyadda & Qorshaynta Maalgalinta (Financial & Investment Planning)	Xisabiyayaasha Maaliyadda	\$25.40	\$33.40	Shahaadada Jaamacadeed
	Financial & Investment Planning	Lataliyayaasha Maaliyadda Gaarka	\$22.10	\$33.20	Shahaadada Jaamacadeed
Xukuumadda & Maamulka Guud (Government & Public Administration)	Daqliga iyo Canshuuraha (Revenue and Taxation)	Naadiyayaasha & Qiimeyayaasha Hantida Maguurtada ah	\$16.10	\$22.30	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
	Maareynta Guud & Maamulka (Public Management & Administration)	Wareysiga U-qalmidda Baanaamijka Dawladda	\$15.10	\$18.90	Meeldhexaad Tababaka Rugta Shaqada
	Qorshaynta (Planning)	Qorshayayaasha Magaalada & Gobollada	\$22.60	\$28.80	Shahaadada Sare ee Jaamacadeed
Sayniska Caafimaadka (Health Science)	Ilaaha waxsoo-saarka Aadanaha (Human Resources)	Qubarada Tababarka & Horumarinta	\$18.00	\$25.30	Shahaadada Jaamacadeed
	Adeegyada Aqoonsiga Cudurrada (Diagnostics Services)	Tegnolojistahda Caafimaadka & Shaybaarka Bukan-eegtada	\$21.20	\$18.00	Shahaadada Jaamacadeed
	Adeegyada Taageerada (Support Services)	Shaqaalaha Bulshada ee Caafimaadka Dhimirka & Xadgudubka Muqadaraadka Mamulayaasha Adeegyada Cuntada	\$14.20	\$29.10	Shahaadada Sare ee Jaamacadeed
Soodhoweynta & Dalxiiska (Hospitality & Tourism)	Maqaayadaha, Cuntada & Adeegyada	Turjubannada Luqadda & Qoraalka Turjubannada	\$17.20	\$21.60	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
	Sharaabka (Restaurants, Food & Beverage Services) Safarka & Dalxiiska (Travel & Tourism)	Qorshayayaasha Kulamada & Shirarka	\$13.70	\$18.10	Shahaadada Labada Sano
	Travel & Tourism	Kaaliiyayaasha Shahaada Leh	\$16.50	\$21.20	Shahaadada Jaamacadeed

KOOKAYNTA XIRFADAHA	WADDADA XIRFADDA	MAGACA SHAQADA LA HAYO	MUSHAARKA HOOSE	MUSHAARKA DHEXE	TABABARKA/WAXBARASHADA LAYSKA RABO
Adeegyada Aadanaha (Human Services)	Adeegyada Daaweynta Dabiiciga (Therapeutic Services)	Maamuleyaasha Meydka	\$24.30	\$24.90	Shahaadada Labada Sano
	Daryeelka Adeegyada Gaarka (Personal Care Services)	Maamulayaasha Bulshada & Adeegyada Jaaliyadda	\$18.70	\$26.10	Shahaadada Labada Sano
	Qoyska & Adeegyada Jaaliyadda (Family & Community Services)	Lataliyasha Ku Xadgubayashaa Muqadaraadka & Jirrada Dabiiciga	\$19.70	\$17.30	Shahaadada Jaamacadeed
	La-talinta & adeegyada Caafimaadka dhimirka (Counseling & Mental Health Services)	Maamuleyaasha Kombiyuutarrada	\$13.90	\$17.20	Shahaadada Sare ee Jaamacadeed
Tignolijiyada Warbaahinta (Information Technology)	Bakhaar-haynta & Xarumaha Qaybinta Hawl-socodsiiinta (Warehousing & Distribution Center Operations)	Xeel-dheerayaasha Taagerada Kombiyuutarrada	\$25.20	\$33.30	Shahaadada Jaamacadeed
	Barnaamij-samaynta & Horumarinta Sofwarka (Programming & Software) Development	Baareyaasha Nidaamka Iskuxirka & Xogta Isgaarsiinta	\$16.30	\$21.10	Shahaadada Labada Sano
	Taageerada warbaahinta & Qaabka Iskurka (Information Support & Services Network Systems)	Xeel-dheerayaashalsbeeshalstaha Maamulka Deg-degga ah	\$25.20	\$32.80	Shahaadada Jaamacadeed
Sharciga, Ammanka Shacabka & Sugidda Ammanka (Law, Public Safety & Security)	Deg-degga & Maareynta Adeegyada Dab-damiska (Emergency & Fire Management Services)	Kaaliiyayaasha Qareenada & Sharciga	\$17.70	\$21.90	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
	Adeegyada Sharciga (Legal Services)	Saraakiska Xabsiyada & Xeel-dheerayaasha Daawaynta Maxaabiista	\$17.20	\$21.60	Shahaadada Labada Sano
	Adeegyada Xabsiyada (Correction Services)	Farsamayaqaannada Injineerimada Warshadaha	\$17.20	\$16.10	Shahaadada Jaamacadeed
Warshadaha (Manufacturing)	Wax-soosaarka Warshadaha (Manufacturing Production)	Horjoogayaasha Mashinada, Ku-rakibayaasha iyo Habeyayaasha	\$18.80	\$23.80	Shahaadada Labada Sano
	Hababka Horumarinta (Process Development)	Isbeshalstayaasha Caafimaadka Shaqada iyo Ammaanka	\$20.90	\$27.10	La Xiriirto Waaya Aragnimada Shaqada
	Daayactirka, Rakibaadda & iyo kabidda Maintenance, Installation & Repair	Wakiilka Adeegyada Macamilka	\$22.90	\$29.50	Shahaadada Jaamacadeed
Suuqgalinta, Beecinta & Adeegga (Marketing, Sales & Service)	Gadashada & Ka-ganacsiga (Buying & Merchandising)	Baareyaasha Sahanka Suuqa	\$11.20	\$14.30	Meeldhexaad Tababaka Rugta Shaqada
	Maareynta Macluumaadka Suuq-gaynta & Cilmi baarista (Marketing Information Management & Research)	Wakiillada Farsamada Badeecada Jumlada & Qalabka Warshadaha	\$21.50	\$29.90	Shahaadada Jaamacadeed
	Xirfadlaha Iibka & Suuq-gaynta (Professional Sales & Marketing)	Farsamayaqaannada Beeraha & Sayniska Cuntada	\$22.90	\$32.30	Shahaadada Labada Sano
Sayniska, Tegnoolijiyada, Injineerimada & Xisaabta (Science, Technology, Engineering & Mathematics)	Sayniska & Xisaabta (Science & Math)	Naqshadda Dhismaha	\$13.00	\$21.30	Shahaadada Labada Sano
	Injineerimada & Tegnoolijiyada (Engineering & Technology)	Oorayaasha Madaniga	\$17.10	\$29.50	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
	Engineering & Technology	Oorayasha Farsamda	\$22.90	\$22.30	Shahaadada Jaamacadeed
Gaadiidka, qaybinta iyo Saadka (Transportation, Distribution & Logistics)	Caafimaadka, Nabdoonaanta & Maareynta Bey'adda Health, Safety & Environmental Management)	Wakiillada Xamuulka Badeecada iyo Badeecada	\$14.00	\$18.70	Meeldhexaad Tababaka Rugta Shaqada
	Iibka & Adeegyada (Sales & Service)	Farsamayaqaanka Qalabka Culus ee Dhaqaaqaya	\$16.30	\$20.30	1-2 Sano ee Tababarka Shaqada
	Hoosada & daacatirka Qalabka Guura (Facility & Mobile Equipment Maintenance)	Gaadiidka & Horjoogayaasha Shaqaalaha Qalabka Dhulka	\$18.40	\$24.10	La Xiriirto Waaya Aragnimada Shaqada

Ilaaha: Waaxda Shaqada iyo Horumarinta ee Minnesota. Isku hallaynta iyo sahmidda shaqooyinka shaqsiyaadka waa mid qaldami karta sababo la xiriira malaynta isbadalka nidaamka wax loo xisaabiyaay. Waxa jira xaalado qeexitaan badan ee laga warhayn. Xaaladaha aan laga warhayn waxa ay noqon karaan iyo saamayn ku yeelan karaan heerarka dhaqaalaha iyo shaqada muddo 10 sano ka badan ee sahanka.

Maxay Muhiim u yihiin Xirfadaha Urursan iyo Wadiiqooyinka Xirfadaha

Ma fududa sidii ardayga loogu diyaarin lahaa shaqooyinka berrito. Horumarka tignoolajiga ah iyo tartanka caalamiga aya lagu micneynayaa ardada in ay diyaar jogta ah u ahaadaan casriyaynta aqoonta xirfadahooda si ay tartanka qayb uga ahaadaan.

Lataliyeaasha iyo bareyaasha waxa ay isticmaalaan qaabka Xirfadda Shaqada Gaarka. Wadiiqdaha si ay ardayga ugu cawiyaan in ay fahmaan xiriirka u dhaxeeya waxa ay dugsiga ku baranayaan iyo xirfadda mustaqbalkooda. Wadiiqooyinka Xirfadda waxa ay bixinaysa xirirkan ayadoo calamaynaysa dhabbaha la marayo dugsiga sare illaa jaamacadda iyo xirfadaha. Waxyabaha ay isaga mid yihiin xirfadaha waxa ay ku jiraan Shaqada Gaarka. Wadiiqooyinka Xirfadda waa ka yarihiin, koox ahaan qaas u ah waxqabashada kamid ah Shaqada. Dhammaan 16ka Shaqooyinka Gaarka iyo 40ka Wadiiqooyin waxa ay ku fasiranyihiin bogga 11ad waxayna ku sharaxanyihiin bogagga 12-13.

Shaqooyinka Gaarka iyo Wadiiqooyinka Xirfadda waxa ay qayb ka yihiin qaab ay soo diyaarisay Waaxda Waxbarashada ee Minnesota, nidaamka Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Minnesota, iyo loo shaqaeeyayaal tira badan. Nidaamka waxa uu dhallinyarada iyo dadka weynba ee wax barta ka caawinayaa in lagula xiriiriyo barashada xirfadaha looga baahanyahay rugta shaqada. Nidaamkan waxaa isticmaala MnCareers, oo laga helo ISEEK, kuna jirta Nidaamka Aqbaarta Xirfadda ee Minnesota, iyo qalab loo isticmaalo indho-indheynta xirfadaha. Ardada shaqa doonka ah ee heer walba ah waxa ay nidaamkan u isticmaali karaan mustaqbalka waxbarashadooda iyo aqoonta looga baahanyahay. Ardada dhallinta yar waxay ay xoogsaari karaan

Garashada waxa ay ku saabsanyihiin

Wadiiqooyinka waxa kale oo kaa caawin

kartaa sidii aad ku dooran lahayd kulliyad

leh Barnaamijyo Waxbarasho ee ku aaddan

danahaaga. Tiro badan ee dugsiyada Minnesota

waxa ay kaashanayaan loo shaqaleyayaasha

deegaanka iyo kulliyadaha si loo soo dhiso

ugu yaraan hal Barnaamij ee Waxbarasho.

xirfadaha caamka ee looga bahaanyahay dhammaan Xirfadda Shaaqooyinka Gaarka (eeg bogga 2d), halka ay ardada ka dhallin weyn iyo kuwa shaqa doonka ah ay diyaar u yihiin in ku biiraan jaamacadda ama shaqaalaha ay qaadan karaan xirfadaha farsamada iyo aqoonta xirfadaha ee looga baahanyahay Wadiiqooyinka u qaasa Xirfadda Shaqada gaarka

Shaqada Gaarka & Wadiiqooyinka Xirfadaha ee Dugsiyada Sare

Sahminta xirfadaha ee loo marayo Wadiiqooyinka Xirfadda waxa ay ku cawinaysa qorshaynta loo sameynayo galitaanka jaamacadda ama si toos loogu biirayo rugaha laga shaqeeyo. Garashada waxa uu loo shaqaeeyaha ka filayo qof kasta ee Xirfadda Shaqada iyo Waadiqada waxa ay ku caawinaysaa qofka shaqa doonka ah ama ardayga xirfadaha iyo waaya aragnimada laga rabo inta aan shaqada la codsan.

Aqoonta loo leeyahay Wadiiqooyinka waxa kale oo ay kaa caawin karaan marka la dooranayo kulliyad leh Barnaamijyo Waxbarasho ee ku aaddan danahaaga. Tiro badan ee dugsiyada Minnesota waxa ay kaashanayaan loo shaqaeeyayaasha deegaanka iyo kulliyadaha si loo soo dhiso ugu yaraan hal Barnaamij ee Waxbarasho.

Aqbaar dheeraada ee ku saabsan nidaamka Career Cluster iyo Pathways, gal internetka ISEEK.org.



Qariiradda Koobaysa Xirfadda Shaqada Gaarka

Lixda Waadiiqo ee Xirfadaha waa qaybta ugu ballaran ee sida laysugu soo habeeyay xirfadaha. Wadiiqooyinka Xirfadaha waxa ay u kala qaybsanyihiin 16 Xirfadda Shaqada Gaarka iyo 81 Wadiiqo.

Wadiiqooyinka Xirfadda

Marka aad eegaysid garaafka goobaysan ee ku yaalla bogagga 12-13 lixda Wadiiqooyinka Xirfadaha waxa lagu muujinaya goobada gudaha ee ku wareegsan Aasaaska Aqoonta iyo Xirfadaha (Foundational Knowledge and Skills) ee dhexda ku jira. (Eeg bogga 2d si aad ku heshid aqbaar dheeraad ah oo ku saabsan aqoonta iyo xirfadaha). Indhoindheynta lixda Wadiiqooyinka Xirfadaha waxa ay billow u yihiin in ay ka caawiyaan indho-indhaynta fursadaha xirfadaha. Caadi ahaan ardada waxa ay indho-indheeyaan Wadiiqooyinka Xirfadaha inta ay ku jiraan dugsiga dhexe iyo billowga dugsiga sare, iyo kaddibna ay baadiqoobkooda ku soo koobaan hal ama laba Xirfadda Shaqada Gaarka ee kamid ah isla Wadiiqada Xirfadda.

Xirfadda Shaqooyinka Gaarka

Bogagga 12-13, magacyada 16da Career Clusters waay ku qoranyihiin far madow oo leh dhibic affar geesod ah (■). Shaqooyinka Gaarka waxaa laysugu aadiyay nooca shaqada iyo nooca warshadaha oo ku salaysan aqoonta iyo xirfadaha guud. Ardayga ama qof shaqa doon ah waxa raadsan karaa xirfado shaqooyin kale iyo warshado kale lagu dabbaqi karo ee saamaynaya dhaaman Shaqada Gaarka, ama baadiqoobka ay ku ekeysiyaan Waadiqada ama shaqa qaas ah.

Wadiiqooyinka Xirfadda

Wadiiqooyinka Xirfadda waxaa lagu aqoonsadaa calaamad (•) oo ka hooseya magaca Shaqada Gaarka leehna goobaabin. Wadiiqooyinka waxa ay qaas kooxahaan u yihiin nooca shaqooyinka ee kamid ah Xirfadda Shaqada Gaarka. Loo shaqeyayaasha waxa ay yiraahdeen mid kasta oo kamid Wadiiqooyinkan waxa uu leeyahay dhowr xirfadood ee u gaar ah. Tiro kamid ah Wadiiqooyinkan waxa ku aaddan Barnaamij Waxbarasho ee laga bixiyo kulliyadaha farsamada iyo kulliyadaha deegaanka.

Barnaamijyada Waxbarashada

Barnaamijka Waxbarashada waa manhaj ka caawinaya kuwa wax baranaya in ay diyaar u noqdaan Waadiqada Xirfadda. Barnaamijka Waxbarashada waxaa uu ka koobanyahay manhaj aan kala go'aynin ee ku salaysan tacliinta iyo xirfadaha heerka warshadaha. Ardada waxa ay billaabi karaan Barnaamijka Waxbarasho inta ay dhigayaan dugsiga sare iyaga oo si adag u baranaya xirfadaha looga bahaan shaqada. Waxa ay u gudbayaan fasallo farsamo u badan, kaddibna u gudbaya kulliyadda si ay u sii wataan aqoonta waxbarashada, xirfadaha iyo kartida laysaga baahanyahay Wadiiqada Xirfadda ee qaaska ah.

WAADIQOQOYINKA XIRFADHA MINNESOTA SHAQADA GAARKA IYO WAADIQOQOYINKA

■ Suuq-galinta, Beecinta iyo Adeegyada

- Iibsiga iyo Badeecinta
- Qaybinta iyo Saadka
- Suuq-galinta Internetka
- Agasiimida iyo Ganacsi Asaasidda
- Isgaarsiinta Suuq-galinta iyo Abaabulidda
- Aqbaarta Agaasimidda Suuq-galinta iyo Sahninta
- Beecinta Xirfadayasn iyo Suu-galinta

■ Ganacsiga a & Agaasinka Maamulka

- Maamulka iyo Tageerada Warfaafinta
- Falanqaynta Ganacsiga
- Agasimidda Maaliyadda Ganacsiga iyo Xisabaadka
- Suuq-galinta
- Wax-soo-saarka Aadanaha
- Agaasinka

■ Soo-dhaweynta iyo Dalxiiska

- Hoteellada
- Tamashlaha, Madaddaalada iyo Soojiidashada
- Makhayadaha iyo Cabitanka Cuntada/Adeegyada
- Safarrada iyo Dalxiiska

■ Maaliyadda

- Bangiga iyo Adeegyada la Xiriira
- Maamulka Maaliyadda Ganacsiga
- Qorshaynta Maaliyadda iyo Maalgalinta
- Adeegyada Caymiska

■ Beeraha, Cuntada & Ilaha Bey'aadda


- Nidaamka Xoolaha
- Nidaamka Warshadaynta Beeraha
- Nidaamka Adeegyada Bey'aadda
- Nidaamka Soo-saarka Cuntada iyo Diyaarinta
- Nidaamka Ilaha Bey'adda
- Nidaamka Warshadda
- Nidaamka Korontada, Dhismaha, iyo Farsamada

■ Tignolojiyada Farshaxanka, Tignolojiyada Fidiyaha Maqalka/Muqaalka/ iyo Warbaahinta

- Tignolojiyada Maqalka/Fidiyaha iyo Filimada
- Jaraa'ida iyo Idaacadda
- Farshaxanka Riwaayadaha
- Tignolojiyada Daabaca
- Isgaarsiinta
- Farshanka Muuqda

■ Tignolojiyada Warbaahinta

- Adeegyada Taageerada Aqbaarta
- Nidaamka Iskuxirka
- Barnaamij-samaynta iyo Horumarka Software
- Isgaarsiinta Internetka iyo Digital



Minnesota
STATE COLLEGES
& UNIVERSITIES

Minnesota
Department
of Education

Aasaaska Xirfadaha iyo Aqoonta

Maktabadda Tacliinta iyo Farsamada

Wax Shaqayn kara • Anshaxa • Nidaamka Wadashaqaynta • Shaqo Baddalista Furfuridda Masalooyinka • Fakaridda Adag Ku Dabaqidda Aqbaarta Tignolojiyada Masuliyadda Sharciga • Warisgaarsiinta Ammanka, Caafimaadka iyo Bey'adda Waxbarasha Bulshada • Xisaabta • Sayniska Ingiriisiga • Dhaqaalaha Shaqsiga

■ Sharciga, Ammana Guud, Asluubta iyo Nabadsugidda

- Adeegyada Asluubta
- Maamulka Adeegyada Deg-degga ah iyo Dab-damiska
- Adeegyada Sugidda Ammaanka
- Adeegyada Sharciga
- Adeegyada Nabadsuggida iyo Difaaca

■ Xukuumadda iyo Maamulka Guud

- Daqliga iyo Canshuurta
- Adeegga Dibadda
- Maamulka
- Nabadsugidda Qaranka
- Qorshaynta
- Agaasinka Guud iyo Maamulka
- Xeerka

■ Adeegyada Aadanaha

- Adeegyada Macaamilka
- Adeegyada Latalinta iyo Caafimadka Dhimirka
- Koritaanka Hore ee Caruurta iyo Adeegyada
- Adeegyada Qoyska iyo Jaaliyadda
- Adeegyada Daryeelka Gaarka

■ Waxbarashada iyo Tababarka

- Maamulka iyo Taageerada Maamulka
- Adeegyada Taagerada Xirfadlayda
- Waxbarashada/Tababarka

■ Sayniska Caafimaadka

- Baarusta Tignolojiyada Nooliga iyo Horumarinta
- Adeegyada Dayactirka
- Adeegyada Taagerada
- Aqbaarta Caafimaadka
- Adeegyada Daawiynta

■ Gaadiidka, Qaybinta iyo Dayactirka

- Rugta iyo Dayactirka Qalalba Socda Gaadiidka
- Caafimaadka, Ammaanka, iyo Maareynta Bey'adda
- Qorshaynta Saadka iyo Maareynta Adeegyada Dayactirka iyo Maamulka
- Beeca iyo Adeegyada
- Hawlaha Gaadiidka
- Nidaamka Gaadiidka/Warshadaha/Qorshaynta/Maamulka iyo Xeerka
- Bakhaarada iyo Xarumaha Hawlaha Qaybinta

■ Naqshadaha Dhismaha iyo Dhismaha

- Dhismaha
- Naqshadda Dhismaha Hortiis
- Dayactirka/Hawlaha

■ Warshadaha

- Waxsoosaarka
- Horumarka Nidaamka Waxsoosaarka Warshadaha
- Dayactirka, Ku-rakibidda, iyo Habaynta
- Tayada Ballanqaadka
- Saadka iyo Kontoroolka Badeecada
- Caafimaadka, Ammaanka, iyo Ballanqaadka Bey'adda Health

■ Sayniska, Tignolojiyada, Injineernimada, iyo Xisaabta

- Injineernimada iyo Tignolojiyada
- Sayniska iyo Xisaabta (Baarista, Aqbaarta iyo Waxbarashada)

Aqriska

■ = Koxaynta Taqasuska Xirfadda • = Waadiiqooyinka Xirfadda

Fasiraadda waxa ay ku qoranyihiin bogga 11d.

Maxaa Laga Raba in uu Waalidka Qabto?

Sua'alaha inta Badan La Isweydiyo ee ku Saabsan Kulliyadaha iyo Xirfadaha

Gabadhayda ma laha wax qorshe ee ka dambeeya dugsiga sare. Sideen ayda uga dhaadhicin karaan in ay ka fakarto mustaqbalkeeda?

Meesha aad ku qasbi lahayd in ay gabadhaada ay samaysanayso qorshaha kulliyadda ama ku doraanayso xirfad shaqo, weydii waxa ay tahay ujeeddada ay u dhisanayso nolosheeda. Maxay doonaysa in noqoto shan sano kaddib? Toban iyo shan sano kaddib? Marka ay ogaato tallabada ay hadda qaadayso in ay saamaynaysa fursadaha mustaqbalka ayaa laga yaaba in ay ku kallifto in masuuliyad iska saarto mustaqbalkeeda.

Ku billow in aan dhallintaada kala hadashid waxa ku saabsan fursadaha xirfadaha ee ku aaddan danaheeda, daqligeeda iyo ujeeddooyinka nolosheeda. Waxaa xiga, samayska qorshooyin jaamacadda ama tababarid kale ee ku aaddan doorashada ujeeddada xirfadahaas. Xusuuso in wax soosaarka tacliinta ay ku dhiganayso dugsiga sare ay saamayn doonaan fursadaha jaamacadeeda iyo tababarradeeda.

Dad badan ayaa ku riyooda in ay noqdaan kuwa cayaaraha warbaahiya, xiddigga TVga, si weyn loo amaano, ama caan noqda iyo nasiib uu ku helo xirfado naf leh ee kale. Inta lagu jiro guusha "shaqada lagu riyooday" waxa surtagal noqota, xaqiiqada waxa ay tahay in aysan taasi suurtagal ahayn. Bal ka fakar dhammaan ardada dusiga sare ee isboorti, oo maantay cayaara. Intee ayaga kamid ah ayaa lacag ka samayn doono cayaaraha rasmiga ah?

Xitaa haddii uu wiilkaada uu u cayaaro jaamacadda, waa in uu si qorshaysto sida uu ku noolaan doono 20ka sano ee soo socda, ee maaha in uu ku xisaabtamo affarta sano kaliya. Weydiiso dhallintaada waxa ku saabsan maaddoyinka uu dugsigiisa/dugsigeeda ka jecelyahay/ jeceshahay. Waxa ay u badantahay in ay jiraan fursado xirfado shaqo ee qancinaya damaciisa. Dhinac ha la eego deqaha waxbarasho ee aan isboortiga ahayn ee dhowr waxbarashada, xiradaha shaqo, asalka iyo siyaaboyin kale. Dhallintaada ku caawi in uu doorto jaamacad leh barnaamijyada waxbarashada uu asaga rabo, ee aan ku ekeyn cayaaraha kaliya ee uu ku riyoonayay.

Gabadhayda waxa ay doonaysa in ay noqoto alxanle iyo in ay ka shaqaysato dhismaha sida aabeheeda. Sideen ugu dhaadhiciyaa in ay raadsato shaqooyin ku habboon gabdhaha?

Wiilkayga waa cayaaryahan aad ugu fiican kubadda laadka. Waxa uu ku talajiraa in uu kamid noqdo kooxda jaamacadda wuxuuna ku rajaweynyahay in uu ku biiro naadiyada NFL. Ma loo baahanyahay in aan kala hadlo fursadaha kale ee ku saabsan xirfadaha, ama aan rajada galiyo in uu koox ay qaadatay doonto iyo in uu helo deeq waxbarasho ee kulliyadeed?

Xaaladda dhaqalaaha ee maanta lagu jiro ma jiraan wax la yiraahdo "shaqo" dumar ama shaqooyin uu ninka ragga kaliya qaban karo. Fikraddan waxa ay dumar badan ku kalliftay in ay u dhaqaaqan dhinaca shaqooyin hoose ama shaqooyin aad uga mushaar yar kuwa ragga ay qabtaan, waxayn rag badan ee soo galaya shaqooyinka ay aadaan shaqooyin aysan u qalmin danahooda iyo ujeddooyinkooda. Ragga iyo dumarka, oo ay ku jirto gabadhaada waxay ay in badan ku qanacsanyihiin xirfadaha ay u doortaan in ay ku shaqaystaan, oo aysan ka shaqaynin shaqooyin loogu talagalay in ay ka shaqeeyaan marka la eego wax ku salaysan mabadiida dhaqameed ama yasmada jinsiga.

Wiilkayga waxa uu niyadda gashaday in uu aado Jaamcadda Sample, laakiin wax ku talagal ah ma uusan ka samaysan waxa uu doonayo in uu barto ama nooca xirfad shaqo ee uu doonayo. Taasi MA CAADI bay tahay?

Wilkaaga waxaa laga yaaba in uu aqbaar fiican uu ka maqlay kulliyad ama jaamacad, laakiin lagama yaabo in dugsigaasi uu yaha mid asaga ku habboon. Dhallintaada ku caawi sidi uu uga fiirsan lahaa waxa uu doonayo in uu ka helo waaya aragnimad jaamacaddisa, oo raadiya jaamacado qancinaya xulashadiisa.

Aadista jaamacadda waa maalgalinta mustaqbalka dhallintaada. Qarashka ku baxaya—oo ay kamid yihiin qarashka waxbarashada, ujooyinka iyo qarashyada kale—waxa ay ku kala duwanyihiin nooca dugsiga. Waa xaqiiqa in qarashka jamacadda uu kor u sii kordhayo, laakiin sida dadka badankooda la tahay qaali uma uu aha. Dadka reer Minnesota badankooda, qarashka waxbarashada jaamacadeed waxa uu inta badan yahay mid ay iska bixin karaa.

Waxa sii dheer qarashka aad adiga iyo wilkaaga aad bixinaysaan, ardada badankooda waxaa la siiya caawinada waxbarashada oo inta badan ka kooban siismo iyo deeq waxbarasho, deymo iyo shaqada waxbarashada. Xafiiska Minnesota ee Waxbarashada Sare waxa laga helaa aqbaar dheeraad ah ee ku saabsan gargaarka waxbarashada marka la galo: www.GetReadyForCollege.org.

Waxaan rabaa in wiilkaygu jaamacad aado, laakiin ma aan awoodo qarashka jaamacadda. Maxay yihiin fursado aan haysto?

Gabadhayda waxay ku qalinjabisay Shahadaada Labada Sano sanadkii hore laakiin ugu badnaan shaqooyin ay raadsato waxa laga rabaa Shahaadada Affarta Sano. Ma waxaa laga rabaa in affar sano oo kale ay jaamacad sii aaddo?

Maya. Gabadhaada waxa ay u badantahay in ay illaa heer dhexe gaartay marka loo eego hanashda Shahaadada Affarta Sano (Shahaadada Jaamacadeed). Dhammaystiridda barnaamijka Shahaadada Affarta Sano kaddib marka la qaato Shahaadada Labada Sano waa shay caadi ah. Adiga iyo gabadhada waa in aad la farisataan waaxda gelitaanka ee dugsiga ay dooaratay in ay aaddo haddii markaa loo tixgaliyo fasallada ay horay u soo qaadatay. Waxaad kaloo weydiisaa haddii waaya aragnimada shaqada loogu tixgalinayo inta ay qaadatay fasallada Shahaadada Jamacadeed.

Nasteexooyin Waalidka ku Caawinaya Qorshooyinka Xirfado Shaqo

Garashada dareemkaaga iyo fikradaha ku saabsan indho-indheynta xirfad shaqo.

Adiga iyo dhallintada labadiinaba waxa aad aqbaar iyo fikrado ku saabsan xirfadaha shaqo doonka aad ka helayan reerkiina, saaxiibbada iyo warbaahinta. Fikraddiina ku aaddan waxbarashada iyo shaqada ayaa ugu qiima badan in ay saamayso dhallintaada. Iska jira aqbaarta fiican iyo kuwa xun ee aad u diraysan jaamacadda, tababarka shaqada iyo fursadaha xirfadaha shaqo. Waxkasta oo ay ahayd noloshada, dhallintaada ku caawi in uu gaaro guusha waxbarashada lagu hananayo.

Shaqadaada ka shekee.

Dhallintaada waxa laga yaaba in uu usaan wax fikrada ah ka haysan waaya aragnimada aad jaamacadda iyo shaqada u leedahay. Xitaa haddii ay dhacday in aad hadda kahor ka wada hadashen waaya aragnimadaada haddana waxa laga yaaba in aysan garanaynin sida aad go'aamada u gaartid iyo horumarka aad samaysay sanadaha aad jagada kaga jirtid shaqadaada. Marka aad ka hadlaysid waxbarashadaada iyo waaya -aragnimada xirfadaha shaqo, si tifatiran uga hadal si markaasi dhallintaada ay wax aan badnayn ku soo koobto doorashadeeda xirfadaha. Kala hadal fasallada aad ka qaadatay dugsiga sare sida ay kugu caawiyeen dhisidda xirfadaha shaqo iyo aqoonta aad shaqada ku qabsatid. Daacad ka noqo qaladaadkaaga. La wadaag go'aamada fiicnaa iyo kuwa xun ee la xiriira hawlaha aad qabatay oo xaddiday xirfaddaada shaqo.

Xoogsaa xiriirka u dhaxeeya waxbarashada iyo xirfadaha shaqo.

Fikradda ay dhallintada ka qabto dusiga waxa ay saamayn ku yeelan kartaa dareenka ay ka qabaan indho-indheynta xirfado shaqo. U sheeg in aad maalin kasta waxa ugu fiican ee aad qabatid ay shaqada tahay oo aadan maaliinsha shaqada uga baaqan baddamaa ay sidaas kula noqotay. Taasina waxa ay lamid waxa aad dusiga ka qabatid sida isxaadirinta iyo wax soosaarka. Kala hadal sida ay darajada uu ka hanto dugsiga sare ay saamayn doonaan fursadaha waxbarashada jaamacadda. Marka laga reebo waxa aad qabatid, dhallintaada ku caawi in uu gaaro heerka waxbarasho ee uu guul kaga gaarayo xirfadaha shaqadiisa.

Dhallintaada ku caawi in uu qiima u yeelo xirfadiisa shaqo iyo anshaxiisa.

Dhallintaada ma aaminsanyahay in shaqo kasto ay qofka siinayso sharaf, isku kalsooni iyo in ay barayso macnaha masuuliyadda? Dhallinta waxa ay u baran karaan anshaxaan iyaga oo ka caawiya hawlaha guriga, tabarrucnimada, ama ay waqtiga gaaban shaqeyaan xilliyada uu dugsiga xiranyahay. Waaya-aragnimoooyinkaas waxa ay barayaan xirfado shaqo sida ku xisabtanka waqtiga, wadashaqaynta iyo go'aan gaaridda. Waxa kale oo ay dhallintaada baraysaa anshaha aqlaaqda, xilkasnimada shaqada, xirfadaha eraybixinta, wax abuuridda iyo xirfado kale oo uu loo shaqeyuhu uu doonayo.

EDhallintaada ku dhiirrigali in uu sahmiyo xirfad shaqo gaar inta uusan dooran wadiiqooyinka xirfadaha.

TWaxaa dhici karta in dhaallinta ay aaminsatahay in ay jirto hal xirfad shaqo ee ayaga loo sameeyay. Haddii aysan xirfadda shaqo u meelmarinna, waxa ay la tahay in ay khasaareen. Nocy badan ee xirfado shaqo ayaa leh hawlo shaqo iyo xirfado iskumida. Mar haddii ay aqoonsadaan sida ay danahooda iyo awooddooda boos uga samayn karaan shaqada gaarka, waxaa jira xirfado shaqooyin badan ee laga sahmin karo isla Shaqada Gaarka.



Garashada in indho-indheynta xirfad shaqo aysan ahayn go'aan hal mar la gaarayo.

Tirakoobka waxa ay muujinaysaa in dadka ay shaqada baddaleen qiyaastiiba 10 jeer inta u dhaxeysa sanadaha 18 illaa 36. Xitaa ayada oo la haysto go'aan xirfad shaqo, dhallintaada hadba waa uu sii qiimaynayaa doorashooyinka uu sameeyay waxbuuna ka baddalaya haddi loo baahdo. Xusuuso in baddalidda ujeeddada xirfad shaqo iyo helista fursado cusub ay kamid yihiin nidaamka qababka. Ujeeddada ma aha in dhallintaada uu hal xirfad shaqo uu ka helo hal shirkad, balse la raadiyo waadiiqo shaqo doon iyo dhowr xirfadood ee lagu hormarayo inta la noolyahay. Eeg boogga 18d si aad ku aragtid tallaabooyinka loo baahanyahay in lagu qaado qaabka indho-indheynta.

Dhallintaada ku caawi in uu qeexo waxa ay guusha tahay.

Lacag badan ee koontada bangiga kuugu jirta ma aha kaliya calaamadda horumarka. Horumarka waxaa lagu xisaabi kara maslaxadda waxqabsashada, xiriir adag oo qoyska iyo saxiibbada lala yeesho, madax bannaani dhaqaale, heerka aad bulshada kaga jirtid iyo siyaabooyin kale. Dhallintaada weydii waxa uu damacsanyahay ama sida u jecelyahay in u u noolaado in ay noqon karto wax muhiim ah guusha looga fiirsan karo.

Dhallintaada ku caawi in uu "tijaabiyo" xirfado shaqo ee kala duwan.

Waxbarashada shaqada ku salaysan iyo sahmiinta hawlaha xirfado shaqo inta aan la gaarin go'aan lagu dhaqaaqayo. Shaqo tababaridda, jago tabarucidda, booqashada rugta shaqada shaqada la kormeerayo waxa ay qofka shaqo doonka ah siinaysaa fursad uu indahiisa ku arko waxa ay tahay xirfad shaqo. Waxaa kale ee sii dheer, in dhallintada aad ku dhiirrigalaysid in uu ogaado xaqiiqada dhabta isaga oo waraysta dad jagooyink kala duwan haya. Cilaaqaadyadan waxaa lagu heli karaa waraysiyo, nasteexo-dhagaysiga ama kamid ahaanshaha urur xirfado shaqo.

Dhallintaada ku dhiirrigali in uu barto xirfado shaqo ee cusub.

Dugsigaaga sare waxa ay u badantahay in uu bixiyo fasallo uu dhallintaada ku baranayo iyo ku dhabaqayo xirfado farsamo, sida barashda kombiyuutarka, tignolojiyda gawaarida, sawir-qaadidda garafyada, barashada xirfadaha kombiyuutarka, suuq-galinta, beeraha iyo kuwo kale. Fasalladan waxa sii kordhinayaan isu diyaarinta jaamacadda iyo iyado si weyn u qancinaya loo shaqeyaha.

Minted ahaw, laakiin yaan lagu karaahsan.

Ka waraysiga joogtada ah ee dhaallintaada ee ku saabsan qorshooyinka xirfadaha shaqada waxa ay dhallintaada ku riixi karaan in uu fikrad xun ka qaato nidaamka sahmiinta. Waxa ka duwan si ayaar ah in aad u weydiisid waxa uu jecelyahay iyo waxa uusan ka helin. Doodda waxa ay ku toosin kartaa waxyaabaha uu danaynayo ama ujeeddada soo gali karta qorshooyinka mustaqbalka.

Ogog in xirfad shaqo kasta aan lagu bilaabaynin shahaado afar sano lagu qaato.

Tira kasta ee waxbarasho ama nooc kasta shaahado ma aha wax si hubaal ah lagu gaarayo xirfad shaqo ee guul leh. Laakiin, loo shaqeyayaaha badankooda waxa ay qofka shaqo doonka ka filayaan waxbarasho dhaafsan dugsiga sare ama uu qofka haysto tababar rasmi ah. Kulliyadaha deegaanka iyo kuwa farsamada waxa ay bixiyaan barnaamijyo lagu mutaysanyo shahaadooyin oo qofka shaqo doonka ah u diyaarinaya wadiiqooyinka xirfad shaqo oo laga helayo shaqooyin mushaar fiican bixiya. Waxa aad heli nooca shaahaadada ama tababar ah ee ku jira Wadiiqooyinka Xirfadaha oo uu dhallintaada danaynayo.

U gudub Qorshaha B.

Inta ay doonto ha noqote waqtiga aad galinaysid doorashada xirfadda, waxyaabaha sida loo qorsheeyay ma noqdaan. Dhaqaalaha oo isbeddala, xaalado qoysseed, shirkadaha oo hannankeeda baddalaysa, jahadii warshadaha oo isbeddesho iyo xaalado kale oo ka baxsan gacanta shaqo doonka waxa ay saamayn weyn ku yeelan karaan ujeeddada xirfad shaqo ee shaqsiigaas. Marka aad dhallintaada ku caawinaysid in uu fahmo in "noloshu ay socoto" waxa uu isku dhiirgalinaya in uu ka gudbo waxa hortaagan oo uu mustaqbalka u soo jeesto.

Dulqaado, oo diyaarna ahaw.

Dadka qaarkod badanaaba waxa ay bilaabaan sahmiinta fakradaha xirfad shaqo ayaga oo caruur ah. Qaarkoodna maba ka fakaraan xirfad shaqo illaa ay toban jir dhaafaan. Dadka waaweyn qaarkod waa ku adagtahay si ay go'aan uga gaaran xirfado shaqo. Haddii uusan dhallintaada diyaar u ahayn in uu jaamacad aado ama go'aanka xirfad shaqo, iska dulqaado. Dhallintaada ku caawi in uu kala barto ujeedooyinka noloshu. Rabitaanka lagu gaarayo ujeedooyinkaas ayaa laga yaabaa in ay fakrado rabitaan ku abuuraa. Marka uu dhallintaada diyaar u noqdo in uu kaala hadlo waxa ku saabsan xirfad shaqo, u diyaargarow in aad isla eegtaan jaamacadaha iyo xirfadaha shaqo. Indho-indhenta ilaha xirfado shaqo waxa ay ku yaallaan boogga 19d.

Lacag badan ee koontada bangiga kuugu jirta ma aha kaliya calaamadda horumarka. Horumarka

waxaa lagu xisaabi kara maslaxadda waxqabsashada, xiriir adag oo qoyska iyo saxiibbada lala

yeesho, madax bannaani dhaqaale, heerka aad bulshada kaga jirtid iyo siyaabooyin kale.

Tallaabooyinka lagu Dooranayo Xirfad Shaqo

Doorashada xirfad shaqo iyo horumarinta xirfadaha shaqo ee layska rabo in lagu guulaysto wadiqadaas waa niidaam, ee maaha wax hal mar go'aan laga gaarayo. Tallaabooyinka hoos ku xusan waxa ay muujinayaan sida qofka shaqo doonka ah uu sahanka xirfad shaqo uga gudbayo una gudbayo shaqaalaynta.

QIIMAYNTA XIRFAD SHAQO

Aqoonso xirfado shaqo iyo doorashada waxbarashada

- Qiimaynta waxa ay cabbiri kartaa xirfadaha, anshaxa, waxa la danaynayo, u jajabnaanta ama dabecadda shaqsiga
- Waxaa la samayn karaa in ayadoo la eegayo, la waraysanayo, dib loo eego xogta, lagu tijaabiyo iyo dib loo eego natiijoyinka

HELITAANKA FURSADAH SHAQADA

Indho-indheynta in sahminata xirfad shaqo si lagu aruuriyo aqbaarta ku saabsan waxbarashada, tababarka iyo heerka laysaga rabo shaqo bilaabidda, daqliga iyo waxtarka laga helayo, iyo bey'adda shaqada

- Socdaal Ganacsiga
- Kulamada Xirfad Shaqo
- Eegid Fasallo Xirfad
- Qalabka Aqbaar Xirfad
- Socdaal Jaamacad
- Waraysiyada Isbarashada
- Shaqo Tababarid
- Aqbaarta Suuqa Shaqada
- Latalinta
- Ururrada Ardada iyo Dadka Shaqeeya
- Barashada Adeegyada
- Shaqooyin Muddo Gaaban
- Tabarucidda

QORSHAHA XIRFAD SHAQO

Samayso qorshe shaqsi ama mid lix sana ah oo ay ku jiraan xirfado shaqo ee muddada gaaban -iyo muddada dheer iyo hadafka waxbarashada

BARO XIRFADAH SHAQADA

Diyaarso xirfadaha caqliga iyo kuwa farsamada (eeg bogga 2d)

- Tababar-xirfadeedka
- Xirfado Shaqo iyo Barashada Farsamada
- Tababar Shaqo & Tabarruc
- Milatariga
- Tababarka Rugta Shaqada
- Tacliinta Dhafsan Dugsi Sare
- Tababarka Muddada Gaaban
- Bandhigyada Shaqada Diyaarka ah

SHAQO RAADINTA

Shaqo ka raadso inta u dhaxaysa wadiiqooyinka la doortay

- Raadso ilaha shaqo raadiska iyo gargaarka, ay ku jirto xiriirinta
- Sahan shaqo qaasa oo shaqo leh iyo shirkadaha
- Diyaarso arjiga waaya aragnimda, warqadda lifaaqa, iyo liistada dad ku yaqaanna
- Wareysiga iyo gorgotonka mushaarka

MAAMULKA XIRFAD SHAQO

Dib u eeg tallaabooyinkii hore haddii loo baahdo inta aad ka shaqaynaysid wadiiqada xirfadaha shaqo

- Wax ka qabo Shaqada Kummelgaarka iyo Shaqo la'aanta
- Horumari Misaanka Shaqada-Nolosha iyo Ujeeddada Develop
- Islasocodka
- Ururada xirfadlayaasha
- Dib u eeg Qorshooyinka iyo Dareenka Ujeedoyinka Dib-u-qiimaynta Qorshooyinka iyo Hadafiyada
- Dib u Tababaridda iyo Waxbarasho Waarta

Ilaha Jaamacadda & Sahminata Xirfado Shaqo

Wadiiqooyinka Xirfadaha Minnesota, Xirfadaha Gaarka & Waaqdiqooyinka Waalidka, ardada iyo barayaasha waxa ay isticmaali karaan Shabakaddan internetka si ay ku helaan aqbaar dheerad ah ee ku saabsan hawlaha degaanka ee Perkins iyo Barnaamijka Waxbarasho ee laga bixiyo qaybo gobolka kamid ah.

<http://mnpos.com>

GetReadyForCollege.org Shabakaddan internetka ee ka socota Xaafiiska Waxbarashada Sare ee Minnesota waxa ay aqbaar u haysa waalidka, ardada dugsi sare iyo kuwa waaweyn wax ku saabsan isu-diyarinta jaamacadda, gargaarka dhaqaalaha, arjiga iyo waxyaabaha laysku xirayo galitaanka, qiimaynta jaamacadda iyo wax dheeraad ah.

www.getreadyforcollege.org

Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Gobolka ee Minnesota Shabakaddan internetka waxa ay ku siinaysa qiyaastii 32 kulliyadaha labada sano ee gobolka iyo jaamacadaha affarta sano, sida aad u xulanaysid kulliyadda iyo codsiga gelitaanka, iyo sida aad u codsanaysid caawimaadda dhaqaalaha taasoo kaa caawinaysa bixinta kharajka kulliyadda.

www.mnscu.edu

College.gov Shabakaddan waxay ka socotaa Waaxda Waxbarashada waxa laga helayaa ila macluumaadka, dhiirrigalinta wax-soosaarka, diyaarinta iyo bixinta waxbarashada dugsi ka baxsan.

www.college.gov

MnCareers Tilmaan-bixiyaha Waalidka Waxaa laga soo degsan karaa internetka oo ah qaabka PDF waxayna waalidka ka caawin kartaa in ay door firfircoon ka qaataan marka uu dhallintoodu sahminayo xirfadaha shaqadooda, nidaamka horumarka xirfadaha shaqo, iyo garashada xaladaha dhabta ah ee maanta haysta suuqa shaqada

www.iseek.org/mncareersparentguide

ISEEK Shabakadda midaysan ee internetka waxa ay ka caawinaysa ardada, shaqo doonka, xirfad beddelayaasha, waalidka, lataliyayaasha, soogalootiga iyo militarigii hore sidii ay ku heli lahaayeen wareysi shaqo, helaan shaqooyinka cusub iyo shaqooyinka aadka loo rabo, ama ay helaan waxbarasho iyo tababarid.

www.iseek.org

Nidaamka Warbaahinta Xirfaa Minnesota (MCIS) Marka aad rukun u noqotid shabakaddan leh ilaha Waaxda Waxbarashada Minnesota waxaa laga adeegsan karaa waxyaabo fiican qaarkood iyo qoraallo xirfado iyo tababarro ee qaas u ah Minnesota aqbaarta iyo xogta qaranka.

<http://mncis.intocareers.org>

CareerOneStop Shabakaddan qameed waxa laga helaa waxyaabo internetka ee xirfado shaqo, ilaha, iyo xiriirada adeegyada deegaanaka ee dadka shaqo doonka ah ee ku jira wadiiqooyinka xirfadaha guusha, ay kamid yihiin Waxbarashada & Hilidda Tababarka, qalabka La Shaqaalaysiin Karo, Baaraha Xirfadaha iyo Sahminata Deeqda Waxbarashada.

www.careeronestop.org

Career Voyages Shabakaddan waxaa soo daaya Waaxda Shqada ee Maraykanka waxana laga helaa aqbaarta xirfaadaha shaqo ee aad u kordhaya, aad loo rabo, iyadoo ay la socdaan xirfadaha shaqo iyo waxbarashada loo baahanyahay si shaqooyinka lagu helo.

www.careervoyages.gov

Minnesota WorkForce Centers Xarun laga helo gobolka oo dhan oo leh Qaybta Ilaha Kombiyuutarrada ee hawlaha shaqo doonka ah, iyo waxa ay lacagla'aan ku bixisaa waxyaabo, ilo iyo adeegyo looga baahanyahay qofka shaqo doonka ah ee loo raadinayo shaqooyin iyo tababarka xirfadaha shaqada. Si lagu helo xarunta WorkForce Center kuu dhow WorkForce Center, wac 1.888.GET JOBS (1.888.438.5627).

www.mnwfc.org

Laataliyayaasha Dugsiga Sare iyo Xaruuma Xirfadaha Shaqada Lataliyayaasha iyo barayaasha waxa ay yihiin ilaha ugu fiican ee qorshaynta xirfadaha iyo waxbarashada kaddib marka laga baxo dugsi sare, ayadoo la haysto waxbarashaa ku saabsan intaxaanka, isu diyaarinta jaamacadda iyo fursadaha xirfadaha. La soo xiriir dugsiagaaga si aad ula hadal lataliyahaaga dhallinyarada.

Ilaha Kale ee Qoysaska Loo Sameyay

Minnesota Parents Know Waa shabakad Waaxda Waxbarashada ee Minnesota waxaana ka buuxa meelo la aaminshayahy in lagu hormarinayo caruurta, waxbarashada, caafimaadka, iyo aqbaarta waalidnimada laga bilaabo dhalashada illaa sanadaha dhallinyarimada.

www.mnparentsknow.info

MinnesotaHelp.info Shabakaddan internetka waa sida buugga adeegyada telefoonada ee loo sameeyay in lagu caawiyo dadka Minnesota si ay ku helaan adeegyada aadanaha, aqbaarta iyo tixraaca, gargaarka dhaqaalaha, iyo fooman kale ee wax lagu caawiyo.

www.MinnesotaHelp.info

Barnaamijyada Kulliyadaha iyo Jamacadaha Goboka ee Minnesota

Kan waa nidaamka sambalka ee barnaamijyada tiradoodu tahay 3,500. Si aad ku heshid aqbaar dheeraad ah, gal www.mnscu.edu.

Beeraha, Cuntada & Ilaha Bey'aadda

Ganacsiga Beeraha & Wax-soosaarka
Sayniska Bey'aada & Dhulka
Beeraha yar, Dhulka & Guriga Cagaaran (Greenhouse)

Naqshadda Dhismaha & Dhismaha

Habaynta Dabaqadaha/Hantida
Maamulka Dhismaha
Kulaylka, Hawada, Qaboojiyaha Hawada & Qaboojiyaha

Frsaxanka, Tignolijiyada A/V & Warbaahinta

Farshaxanka Digital, Filimada Kombiyuutarka & Warbaahinta
Sawirka Qariidada & Warbaahinta Sawirka leh
Isgaarsiinta Guud & Saxaafadda

Ganacsiga, Agaasimka & Maamulka

Xisaabaadka
Kaaliyaha Maamulka & Taageeridda
Ganacsiga, Agaasimka & Maamulka

Waxbarashada & Tababarka

Kaaliyaha Waxbarashada/Paraeducator
Waxbarashada Qaaska
Waxbarashada – Barbaarinta Hore

Maaliyadda

Caymiska
Shaqo Abuuraha
Maaliyadda

Dawladda & Maamulka Guud

Waxbarashada Caalamka/Xiriirka Caalamka
Lataliyaha Maamulka Sharciga
Maamulka Guud

Sayniska Caafimaadka

EMT – Jaawabaha Aasaasiga ama U Horreeya
Tignolijiyada Caafimaadka/Sayniska Shaybaarka Bukaana-eegtada
Kalkaalnimada

Soo-dhaweynta & Dalxiiska

Farshaxanka Cunta Kariska & Adeegyada Cuntada
Hoteelada, Maqaayadaha & Hawlwadeenada Qamaarka
Oorshaynta Safarka/Dalxiiska

Adeegyada Aadanaha

Daryeelka Caruurta/Koritaanka
Kaalmada Jaaliyadda/Adeegyada Aadanaha & Itaalidarrida
Latalinta – Ku Ximaanshaha Kimiikada

Tignolijiyada Warbaahinta

Barnaamijyada Kombiyuutarka
Tignolijiyada Kombiyuutarka & Adeegyada Taageerada
Nidaamka Maamulka Warbaahinta

Sharciga, Ammanka Guud & Nabadsugidda

Sharciyada Dambiyada/Asluubta
Sharciga Nabadsugidda
Kaaliyayaasha Qareennada

Warshadaha

Mashiinada
Warshadaha & Tignolijiyada Warshadaha
Robotics/Qalbaka Tignolijiyada

Suuq-galinta, Adeegyada & Adeegyada

Naadinta
Adeegyada Rukunka/Xarunta
Suuq-galinta & libinta

Saybusja, Tignoolijiyada, Injineernimada & Xisaabta

Sayniska Beeraha & Tignolijiyada
Masawiridda - hindisnimada, Korontada & Mashinka
Injineernimada - Guud

Gaadiidka, Qaybinta & Dayactirka

Farsamada Gaariga
Maamulka Diyaaradaha & Sayniska Hawada
Mekaanikada – Motorrada Diiselka/Gawaarida Weyn

2-YEAR CENTRAL -- 2- SANO DEEGAANKA DHEXE

Alexandria
Anoka-Ramsey, Cambridge
Central Lakes, Brainerd
Central Lakes, Staples
Pine, Pine City
St. Cloud Technical

2-YEAR METRO AREA -- 2- SANO DEEGAANKA MAGAALADA

Anoka-Ramsey, Coon Rapids
Anoka Technical, Anoka
Century, White Bear Lake
Dakota County, Rosemount
Hennepin, Brooklyn Park
Hennepin, Eden Prairie
Inver Hills, Inver Grove Heights
Minneapolis
Normandale, Bloomington
North Hennepin, Brooklyn Park
Saint Paul

2-YEAR NORTHEAST -- 2- SANO DEEGAANKA WAQOOWI-BARI

Fond du Lac, Cloquet
Lake Superior, Duluth
NE - Hibbing
NE - Itasca, Grand Rapids
NE - Mesabi Range, Eveleth
NE - Mesabi Range, Virginia
NE - Rainy River, Intl. Falls
NE - Vermillion, Ely

2-YEAR NORTHWEST -- 2- SANO DEEGAANKA WAGOOYI-GALBEED

MN St. CTC, Detroit Lakes
MN St. CTC, Fergus Falls
MN St. CTC, Moorhead
MN St. CTC, Wadena
Northland, East Grand Forks
Northland, Thief River Falls
Northwest, Bemidji

2-YEAR SOUTHEAST -- 2- SANO DEEGAANKA KOONFUR-BARI

MSC-SE Technical, Red Wing
MSC-SE Technical, Winona
Riverland, Albert Lea
Riverland, Austin
Rochester
South Central, Faribault
South Central, North Mankato

2-YEAR SOUTHWEST -- 2- SANO DEEGAANKA KOONFUR-GALBEED

Minnesota West, Canby
Minnesota West, Granite Falls
Minnesota West, Jackson
Minnesota West, Pipestone
Minnesota West, Worthington
Ridgewater, Hutchinson
Ridgewater, Willmar

4-YEAR UNDERGRADUATE -- 4- SANO DEEGAANKA

Bemidji State
Metropolitan State
Minnesota State, Mankato
Minnesota State Moorhead
St. Cloud State
Southwest Minnesota State
Winona State

ONLINE PROGRAMS -- BARNAMIJYADA INFERNETKA

MinnesotaOnline.org